Paid Leave Oregon

# Waxa Aad U baahan Tahay si aad U Codsato Dheefaha: Fasaxa Qoyska

Isticmaal liiskan hubinta si aad ugu diyaargarowdo inaad codsato dheefaha.

## Shaqaalaha iyo dadka iskood u shaqeysta ee doortay caymiska waxay sameyn karaan iney:

- Furo koonto Frances Online
- Ka codsadaan dheefaha onlayn iyagoo u maraayo akoonkooda Frances Online
- Ku codso dheefaha boosto ahaan ama taleefanka:
  - Ka soo dejiso oona daabaco codsiga websaydka Fasaxa Mushaharka leh
  - Naga soo wac lambarka 833-854-0166 (lambarka bilaashka lagu soo wici karo)

Frances Online waa habka **ugu dhakhsaha iyo fudeedka badan** ee lagu codsan karo Fasaxa Mushaharka leh. Haddii aadan geli karin Frances Online, waxaad ka soo dejisan kartaa codsiga websaydkeena oo aad noogu soo diri kartaa boostada ama naga soo wac 833-854-0166 si aad telefoon ugu codsato. Haddii aad ku codsato codsi warqad ah ama telefoon ahaan, waxa laga yaabaa inay kugu qaadato wakhti dheer inaad hesho jawaab.

Waxaa laga yaabaa inaad haysato qof kale oo kuu codsada dheefaha Fasaxa Mushaharka leh isagoo adiga ku matalaya isagoo buuxinaya Foomka Loo Qoondeeyay Wakiilka. Fadlan eeg Buug-hageedka Shaqaalaha wixii macluumaad dheeraad ah.

Haddii loo-shaqeeyahaagu leeyahay qorshe u dhigma halkii aad ka qaybqaadan lahayd Fasaxa Mushaharka leh ee Oregon, waa inaad si gaar ah u codsato qorshahaas u dhigma. Weydii cidda aad u shaqayso tilmaamo ku saabsan sida taas loo sameeyo.

## U diyaar garow

**Ka hor intaadan codsan:**

- ☐ U sheeg loo-shaqeeyahaaga - waxaad u baahan tahay inaad u sheegto loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan 30 maalmood ka hor taariikhda bilawga fasaxaaga. Marka lagu jiro xaalad degdeg ah, waxaad siin kartaa ogeysiis af ahaan ah 24-saac ka dibna waxaad raacsiin doontaa ogeysiis qoran 3 maalmood gudahood. Haddii aadan bixin karin ogeysiis, qof kale ayaa kuu sameyn kara.

  **Ogoow:** Haddii aadan muujin karin inaad u sheegtay shaqo-bixiyahaaga fasaxaaga, Fasaxa Mushaharka lehi waxa laga yaabaa inuu hoos u dhigo lacagtaada dheefaha buuxa ee toddobaadlaha ah ee ugu horreysa ilaa 25%.

- ☐ Isku-dubarid macluumaadka aad u baahan doonto - faahfaahinta tallaabo kasta ayaa lagu daray liiskan hubinta.

- ☐ Ka sameyso koontada Sheegtaha Frances Online - Frances Online waa habka ugu dhaqsaha badan ee lagu codsado dheefaha. Haddii aad iskaa u shaqeysid, koontada sheegtaha waa akoon labaad. La mid ma'aha koontada loo shaqeeyaha ee aad u samaysatay si aad u codsato caymis.

## Tallaabada 1: Furo koonto Frances Online

**Waxa aad u baahan tahay si aad koonto u furato:**

- ☐ Magacaaga buuxa ee sharciga ah iyo taarikhda dhalashada.
- ☐ Lambarkaada Soshal Sekuritiga (SSN) ama Lambarkaada Aqoonsiga Gaarka ah ee Canshuur Bixiyaha (ITN).
- ☐ Xogta lagaala xiriiraayo, uuna ku jiro lambarka taleefankaaga, ciwaanka iimeelka, ciwaanka guriga, iyo ciwaankaada boostada, haddii uu ka duwan yahay cinwaanka gurigaaga.
- ☐ Leysankaaga gobolka ama kaarka aqoonsiga gobolka (haddii aad mid leedahay).
- ☐ Ciwaankaaga iimaylka.
- ☐ Haddii aad hore u xaraysatay sheegashada Fasaxa Mushaharka leh ama Caymiska Shaqala'aanta, waxa laga yaabaa inaad u baahato in aan kuu soo dirno warqad si aad akoonkaaga ugu samaysato si ammaan ah.

## Tallaabada 2: Codso dheefaha

**Waxaad isla markiiba codsan kartaa ka dib markaad koonto ka samaysato Frances Online. Gal Frances Online si aad u codsato.**

### Waxa aad u baahan tahay si aad u codsato:

- ☐ Magacaaga isticmaale iyo eraygaaga sirta ah haddii aad ka dalbanayso adoo u maraaya Frances Online.
- ☐ Lambarkaada Soshal Sekuritiga (SSN) ama Lambarkaada Aqoonsiga Gaarka ah ee Canshuur Bixiyaha (ITN).
- ☐ Nooca fasaxa aad codsanayso.
- ☐ Jadwalka fasaxa ee aad codsatay (xiriir ama goos-goos ah) iyo bilawga iyo dhammaadka taariikhda la filayo ee fasaxaaga mushaharka leh.
    - Fasax xiriir ah waxaa laga wadaa in aad fasax qaadanayso laga bilaabo taariikhda biloowga ilaa taariikhda dhammaadka fasaxaaga, adiga oo aan marna ka shaqayn wax shaqo ah inta lagu jiro mudadaas.
    - Fasax goos-goos ah waxaa laga wadaa inaad qaadato maalmo ama asbuucyo fasax ah inta u dhexaysa taariikhda biloowga iyo taariikhda dhammaadka fasaxaaga, laakiin sidoo kale waad shaqaysaa inta lagu jiro fasaxaaga. Waa in aad qaadatid fasax ku meel gaar ah haddii aad fasax u qaadanayso laba ama in ka badan oo

dhacdooyin nololeed isku mar ah ama haddii aad codsaneyso hor sii meeleysiga fasax.

- ☐ Macluumaadkaagii shaqo ee hadda iyo 18-kii bilood ee tagay oo ay ka mid yihiin:
    - Magaca ganacsiga, ciwaanka, iyo lambarka taleefanka ee loo shaqeeyaha
    - Lambarka aqoonsiga ganacsiga ee loo-shaqeeyahaaga (business identification number, BIN) ama Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Federaalka (Federal Employer Identification Number, FEIN) (ka raadso loo-shaqeeyahaaga lambarradan)
    - Jeegadaada shaqada (si uu kaaga caawiyo helitaanka shaqadaada)
    - Taariikhda shaqaaleyntaada
    - Inta jeer ayuu mushahar ku siiyaa shaqo-bixiyahaaga
    - Imissa ayuu shaqo-bixiyahaagu ku siiyaa
    - Tirada maalmaha ee toddobaad kasta ee aad sida caadiga ah ugu shaqeyso loo-shaqeeye kasta
    - Taariikhda aad u sheegtay shaqo-bixiyahaaga wax ku saabsan fasaxaaga
- ☐ Macluumaad ku saabsan dheefaha wakhtiga lumay ee Magdhawga Shaqaalaha ama dheefaha Barnaamijka Caymiska Shaqala'aanta ee laga yaabo inaad hesho.
- ☐ Xog ku saabsan qorshe kasta oo u dhigma kan oo aad heysato iyo fasax kasta oo mushaar lagu baxsho oo aad caymiskan ku qaadatay.
- ☐ Habka lacag bixinta dheefta ee aad door bidayso. Waxaad kala dooran kartaa kaarka kaashka lacagta lagu shubto iyo lacag shubista tooska ah. Haddii aad doorato lacag shubista tooska ah, waxaad u baahan doontaa koontadaada bangiga iyo sagaalka nambar cinwaaneed ee bankigaada.
- ☐ Dookhaaga ku aadan jarista canshuurta.

## Tallaabada 3: Xaqiijinta Aqoonsiga

Kadib markaan helno codsigaga, waxaan xaqiijin doonaa aqoonsigaga. Mararka qaarkood, waxa laga yaabaa inaan u baahanahay macluumaad dheeraad ah si aan u xaqiijino aqoonsigaaga. Waxa laga yaabaa in aanu kuugu soo dirno warqad boostada Maraykanka, xataa haddii aad doorataay in aad hesho digniinaha iimaylka marka aad samaysanaysay akoonkaaga. **Fadlan la soco boostadaada Maraykanka** oo diyaar u noqo inaad ka jawaabto su'aalaha daba-galka ah ee laga yaabo inaan qabno.

## Tallaabada 4: Xaqiiji dhacdo nololeedkaaga

**Waxa aad u baahan tahay si aad u xaqiijiso dhacdadaada nolosha**

Waxaa ka jiri doonta xog-ururinta gudaha akoonkaaga Frances Online kaasoo ku weydiin doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sheegashadaada. Waxaad u baahan doontaa inaad

gasho akoonkaaga Frances Online oo aad buuxiso su'aalaha. Waxaan sidoo kale ku weydiin doonaa inaad soo dirto dukumeentiyadaada (hoos ku taxan) si loo xaqiijiyo dhacdo nololeedkaaga u-qalanta. Sida ugu fudud ee tan loo sameeyo waa inaad fariin ugu soo dirtaa gudaha kaaga ah Frances Online ee akoonka Dacwoodaha/Sheegtaha. Haddii aadan lahayn akoon Frances Online, waxaad ku soo diri doontaa dukumeentiyada xaqiijinta codsigaaga warqad ahaanta ah. Waxa kale oo laga yaabaa inaan ku soo wacno si aan u helno macluumaadka loo baahan yahay.

Dukumeentiyada xaqiijinta ee aanu ku waydiisanayno waxay ku xidhan yihiin nooca fasaxa aad u baahan tahay. Waxaad u baahan tahay inaad hal dukumeenti naga siiso liiska hoos ku qoran. Haddii dukumeentigani aanu ku jirin dhammaan macluumaadka loo baahan yahay si loo xaqiijiyo fasaxaaga, waxa laga yaabaa inaan ku waydiino macluumaad dheeraad ah.

Dukumeentiyada liiskan ku jira waxay laga yaabaa iney leeyihiin qaybo uu bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ee xubnaha qoyskaaga ay uga baahan yihiin inay buuxiyaan.

### Fasaxa qoyska si aad u daryeesho aadna waqti ula qaadato ilmo sannadka koowaad kadib marka uu dhasho:

Haddii aysan ahayn iney soo saartay hay'ad dawladeed mooyaane, dukumeentigaaga xaqiijinta waa inuu ku jiraa soo saaraha magaciisa koowaad iyo kan dambe, cinwaanka ama waxa uu ku takhasusay, macluumaadka xidhiidhka, saxiixa gacanta lagu sameeyay ama mid elektarooniga ah, iyo taariikhda dukumeentiga la saxiixay ama la soo saaray. Dukumentiyada xaqiijinta ee aad isticmaali karto waa:

- Shahaadada dhalashada rasmiga ah ee ilmahaaga.
- Foomka Xaqiijinta Fasaxa Mushaharka leh ee Oregon ee ku aadan Dhalmada. Haddii tan la soo saaray ka hor intaan ilmuhu dhalan, waa in la taariikheeyaa oo la saxiixaa 60 maalmood ka hor taariikhda dhalashada ee la filayo.
- Warbixinta Qunsuliyada ee Ilmaha Dibada Ku dhasha.
- Dukumeenti ay maxkamad soo saartay oo xaqiijinaya aabbanimada ama mas'uuliyadda.
- Yaqiinsanaanta Ikhtiyaariga ah ee Aabbanimada oo uu saxiixay oo uu markhaati ka yahay wakiilka isbitaalka oo la soo saaray 5 maalmood gudahooda kadib dhalashada ilmahaaga.
- Dukumiinti kasoo baxay dhakhtarka ilmahaaga ama waalidka uurka leh. Waalidka uurka leh wuxuu noqon karaa adiga ama waalidka kale ee ilmaha, laakiin dukumeentigu wuxuu u baahan yahay inuu kuu diiwaan geliso adiga inaad tahay waalidka ilmaha. Haddii tan la soo saaray ka hor intaan ilmuhu dhalan, waa in la taariikheeyaa oo la saxiixaa 60 maalmood ka hor taariikhda dhalashada ee la filayo. Dib uga eeg Buug-hageedka Shaqaalaha wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dukumeentigan.
- Foomka isbitaal dhigista ee meesha ilmahaagu ku dhashay.

Wixii ah **laba toddobaad oo dheeraad ah oo fasax ah oo la xiriira uurka,** waxaad u baahan tahay dukumeenti muujinaya xidhiidhka aad la leedahay ilmahaaga ka waalid ahaan kaasoo hadda uur leh ama aad dhalay gudaha sanadka ka hor inta uusan bilaabanin fasaxaaga.

### Fasaxa qoyska si uu u daryeesho oo aadna waqti ula qaadato ilmo sannadka koowaad kadib marka aad ku meeleyso xarun korsasho ama daryeel korineed:

Haddii aysan ahayn iney soo saartay hay'ad dawladeed mooyaane, dukumeentigaaga xaqiijinta waa inuu ku jiraa soo saaraha magaciisa koowaad iyo kan dambe, cinwaanka ama waxa uu ku takhasusay, macluumaadka xidhiidhka, saxiixa gacanta lagu sameeyay ama mid elektarooniga ah, iyo taariikhda dukumeentiga la saxiixay ama la soo saaray. Dukumentiyada xaqiijinta ee aad isticmaali karto waa:

- Nuqulka amarka maxkamada oo xaqiijinaaya meelaynta cunugaaga.
- Waraaq uu saxiixay qareenka kugu matalaayay kiiska korsashada ama la wareegida ilmaha kaasoo xaqiijinaaya in ilmaha aad waalid u noqotay.
- Dukumiinti kasoo baxay daryeelka ubadka, wakaalada ilmo korinta, ama shaqaalaha bulshada ee qaybta ka ahaa ilmaha lagugu wareejiyay kaasoo xaqiijinaaya in ilmaha lagugu wareejiyay.
- Dukumiintiga cunugaaga oo kasoo baxay Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka ee Maraykanka (USCIS).

### Fasaxa qoyska si aad u daryeesho xubin qoyskaaga kamid ah oo qaba xanuun daran:

Waxaad u baahan tahay inaad muujiso caddaynta xaaladda caafimaad ee xun ee xubinka qoyskaaga taasoo ka socota bixiye daryeel caafimaad.

Dukumentiyada xaqiijinta ee aad isticmaali karto waa:

- Foomka Xaqiijinta Xaaladaha Caafimaadka ee Daran ee Paid Leave Oregon
- Cadaynta Dhahtarka ee Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka ee Federaalka iyo Oregon
- Xeerka Fasaxa Qoyska iyo Caafimaadka (FMLA) Warqadda Xaqiijinta ee Daryeel Bixiyaha Caafimaadka ee loogu talagalay Foomka Xaalada Caafimaadka Halista ah ee Shaqaalaha
  - Ogoow: Waaxda Shaqada ee Mareykanka ayaa bixisa foomkan. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa nooca loo-shaqeeyaha ee shahaadada FMLA ee loogu talagalay xaalad caafimaad oo halis ah.
- Dukumeenti uu bixiyo daryeel-bixiye caafimaad
- Dukumentiyeeynta kale — booqo Buug-hageedka Shaqaalaha si aad u hesho liiska shuruudaha dukumeentiyeeynta

Dukumiintigaaga waa in lasoo raaciyaa xogta soo socota:

- Magacaaga iyo magaca qoyskaaga
- Taariikhdaada dhalashada

- Qiyaasta taariikhda ay xaaladda caafimaad ee halista ahi bilaabatay ama ay abuurtay baahida loogu baahan yahay fasax-qaadashada
- Qiyaas macquul ah oo ku saabsan muddada xaaladda ama muddada soo kabashadaada
- Qiyaas macquul ah oo ah inta jeer iyo muddada fasaxa ku meel gaarka ah iyo jadwalka daawaynta ee la qiyaasay, haddii ay khusayso
- Cudur-oggaansho ama macluumaad kale si loo ogaado in xubinka ka tirsan qoyskaada uu qabo xaalad caafimaad oo halis ah

Dukumeentigaaga xaqiijinta waa inuu sidoo kale kugu caddeeyaa, magacaaga koowaad iyo kan dambe, ka ahaan xubin ka tirsan qoyska bukaanka. Haddii dukumeentigaagu aanu muujin xidhiidhka qoyska ee idinka dhexeeya adiga iyo bukaanka, waa inaad sidoo kale dirtaa ugu yaraan mid ka mid ah dukumeentiyada soo socda:

- Shahaado guur ee sharciga ah
- Bayaanka shahaadada ah ee Lamaananimada Qoyseed
- Shahaadada dhalashada ee sharciga ah
- Hal ama in ka badan oo dukumeenti ah oo ay soo saartay qolo saddexaad oo madax-bannaan oo la xaqiijin karo oo cadeeneysa guurka, lammaane qoyseed, ama xidhiidh qoys oo muhiim ah oo ka dhexeeya adiga iyo bukaanka. Dukumeentiga waa in lagu soo saaraa lix bilood ka hor wakhtigaaga bilaabashada fasaxa.

**Fasaxa qoyska ee hawlaha meelaynta wakhtiga hore ee lagama maarmaanka u ah in ilmaha lagu soo dhaweeyo gurigaaga iyada oo loo marayo korsashada ama daryeelka korinta:**

Dukumeentiga xaqiijinta waa inuu ahaadaa mid ku taariikhaysan wakhti aan ka horeyn 180 maalmood ka hor taariikhda bilaabashada fasaxa aad codsatay.

Waa inay muujisaa:

- Magacaaga koowaad iyo magacaaga dambe sida ka ahaan walid korinta ama ka korsashada ilmaha
- Magaca koobaad iyo kan danbe ee ilmaha
- Taariikhda dhalashada ilmaha.
- Haddii aysan ahayn in dukumeentigaagu ay soo saartay hay'ad dawladeed, waa iney lahaataa Magaca koowaad iyo kan dambe ee soo saaraha
    - Magaca ama waxa uu takhasusku yahay
    - Macluumaadka xiriirka sida ciwaanka boostada, iimaylka ama lambarka taleefanka, saxiixa gacanta lagu sameeyo mise kan elektarooniga ee soo saaraha
    - Taariikhda dukumeentiga la saxiixay.

Dukumentiyada aad isticmaali karto waa:

- Koobi amar maxkamadeed.

- Warqad uu saxiixay qareenka matalaya waalidka korsiinada ama korsashada ilmaha.
- Dukumeenti ka socda goobta daryeelka korinta, wakaalada korsashada, ama shaqaale bulsho oo ku lug leh meelaynta.
- Dukumiintiga ilmahaaga oo kasoo baxay Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka ee Maraykanka

**Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loogu codsado dheefaha iyada oo loo marayo Frances Online, fadlan ka daawo muuqaalka How to Apply for Benefits Overview video (Muuqaalka Dulmarka ee Sida Loo Codsado Dheefaha) barta paidleave.oregon.gov.**

Akhri kuwayaga ah Buug-hageedka Shaqaalaha, Buug-hageedka Iskii U Shaqeystaha, ama booqo paidleave.oregon.gov si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo faahfaahsan oo ku saabsan codsashada dheefaha.